# Ma ka Codsan karaa Magangelyo Wadanka United States?

### Can I Apply for Asylum in the United States?



Warqadan xogta aruursan ahi waxa ay ka hadashaa magangelyadda iyo cidda xaqqa u leh. Waxaa jira 3 siyaabood oo kala duwan oo loo codsan karo magangelyo iyadoo hadba ku xiran cidda aad tahay iyo taariikhdaadda laanta socdaalka (immigration). Warqadan xogta aruursan ahi waxa ay kaa caawin inaad fahamto midka uu yahay sharciga aad u baahan tahay inaad cuskato kolka aad dalbanayso.

Barta LawHelpMN.org waxa ay haysaa xogag aruursan oo kale oo kaa caawinaya inaad dalbato magangelyo. Warqadan xogta aruursan ahi waxa ay kaa caawin inaad go'aansato midda ay tahay warqadda xogta aruursan ah ee kale ee ay tahay inaad isticmaasho. Waxaa jira $100 oo khidmad oo la bixiyo si aad u dalbato magangelyo.

Si aad u akhrido warqadan xoga aruursan ah oo Ingiriis ah ama Afaf kale ah, booqo: LawHelpMN.org

**Warqadan xogta aruursan ah waxaa sameeyey iskaashiyo dhexmaray hay'adaha Immigrant Law Center of Minnesota, Mid-Minnesota Legal Aid, Southern Minnesota Regional Legal Services, The Advocates for Human Rights, iyo the Volunteer Lawyers Network. Waxaana gargaaray maalgeliyey laga helay Waaxda Adeegyadda Bulshadda ee Gobolka Minnesota (State of Minnesota Department of Human Services).**

# Xaq u Yeeladka Magangelyadda

## Waa maxay Magengalyaddu?

Magangelyaddu waa qaab ilaalin ah oo kuu ogolaada inaad joogto wadanka Mareykanka (US). Waa jid aad ku heli karto sharci deganaansho ah iyo muwaadinimo. **Waxa kaliya oo aad dalban kartaa magangelyo haddii aad ka baqayso inaad ku noqoto wadankii aad u dhalatay.** Waa khasab in halkaa wax lagugu yeelay ama aad aaminsan tahay in wax lagugu yeeli doono haddii aad ku noqoto. Haddii aad xaq u leedahay magangelyo, waa khasab inaad dalbato. Iskama aad helaysid magangelyo waayo waxa aad ka cabsanaysaa inaad wadankaagii ku noqoto.

## Waxyeelo caynkee ah ayaan u baahnahay inaad cadeeyo?

Waa khasab inaad cadeyso in wax lagu yeelay ama wax lagu yeeli karo sababtoo ah **ugu yaraan mid** ka mid ah waxyaabahan:



**Sinjigaagga.** Waxaa laga yaabaa in lagu bartilmaameedsado sababtoo ah muuqaal dad gaar loogu yaqaan ama kooxda aad ka mid tahay. Tusaale: waxaa dhici karta in lagu bartilmaameesado iyadoo sababtoo ah waxa aad tahay dadka reer-guriga ah.



**Diintaadda.** Waxaa dhici karta in lagu bartilmaameedsado iyadoo sababtu tahay waxa aad diiday inaad ku dhaqanto diin aadan doonayn. Waxaa siddoo kale lagugu bartilmaameedsan karaa sidda aad ugu dhaqanto diintaadda.




**U dhalashadaadda.**



**Ra'yigaaga siyaasadeed.** Waxaa dhici karta in lagugu bartilmaameedsado waayo waxa aad taageertaa ama ka soo hor jeesataa koox ama dowlad. Waxaa dhici karta in lagu bartilmaameedsado waayo waxa aad sameysay fal aad ku taageerayso ama aad uga soo hor jeesanayso arin siyaasadeed. Taa macnaheedu waxa uu noqon karaa waxa aad tagtay banaan-bax ama waxa aad tiri hadalo dowlad ka soo hor jeeda. Siddoo kale waxa uu macnaheedu noqon karaa waxa aad qaadatay mowqif aad ku ayidayso ilaalinta xaquuqda aadanaha, aaminsanaan sinaan, ama waxa aad qabtaa fakar taageersan xaquuqda haweenka,  ama aad u dhaqdhaqaaqday xaquuqda dadka reer guriga ah.



**Urur bulsho oo aad ka tirsan tahay oo aadan bedeli karin ama aysan ahayn in lagu faro inaad bedesho.** Taa waxaa ku jira qoomiyadaadda, jinsiyadaadda, cidda aad la galmooto, koox qabiil ama qaaruun ama qoys.



**Tusaale: Danny waxa uu codsanayaa magangelyo waayo sinjigiisa iyo ra'yi siyaasadeed oo uu qabo.**

Danny waxa uu ka tirsan yahay qabiil reer-guri ah oo ah reer El Salvador. Waxa uu u dhaqdhaqaaqaa xaquuqda mulkiyadda dhulka ee dadka reer guriga ah. Waxaa xiray, su'aalo waydiiyey, garaacay, una hanjabay bilayska. Bilaysku waxa ay u sheegeen inuu joojiyo dhaqdhaqaaqiisa. Danny waxa uu codsanayaa magangelyo sababtoo ah sinjigiisa (asagu waa dadka reer guriga ah) iyo sababta ah aragtidiisa siyaasadeed. (u dhaqdhaqaaqa xuquuqda dadka reer guriga ah).



**Tusaale: Ixchel waxa ay codsanaysaa magangelyo sababtoo ah sinjigeeda.**

Ixchel waa 13 sanno jir. Aabaheed ayaa garaacay kuna tacadiyey iyada iyo walaalaheed iyagoo jooga Guatamala. Waxa uu ugu hanjabey inuu dili doono iyaga marmar badan. Bilaysku sidoo kale waxa ay ula dhaqmeen iyadda si ka duwan sidda dadka kale waayo iyaddu waa Dadka reer-guriga ah. Ixchel waxa ay codsanaysaa magangelyo waayo waxa ay u baqaysaa nafteeda haddii ay ku noqoto aabaheed iyo sababta ah jinsigeeda (iyaddu waa Dadka reer guriga ah).

## Dadku iminka wali ma codsan karaan magangelyo?

Haa.  Wali waa aad dalban kartaa magangelyo. Maamul walba oo siyaasadeed wax ayuu ka bedelaa sharciyadda laanta socdaalka (immigration), laakiin codsiga magangelyaddu wali waa xaquuq sharci ka ah wadanka Mareykanka (US). Ilaha inta ugu badan la aamino ee akhbaartu waa qareen sharciyadda laanta socdaalka yaqaan. Shabakadaha (websites) dowladda Mareykanku (US) waa ay adkaan karaan in la fahmo ama ay hayaan akhbaartii ugu dambaysay ee soo baxday.

## Ma jiraan wax khataro ah oo la xiriira codsiga magangelyadda?

Waxaa jiri kara khataro, gaar ahaan haddii **AADAN** ku jirin jidka ka saaridda wadanka. La tasho qareen sharciyadda laanta socdaalka yaqaan si aad u hubiso inay amaan tahay inaad codsato.

**Kaliya dalbo magangelyo haddii aad ka cabsanayso in wax lagugu waxyeelo wadankaaga aad u dhalatay.** Waa khasab inaad uga jawaabto su'aalaha ku qoran foomka codsiga magangelyadda si buuxda oo daacadna ah. Haddii aad been ku qorto codsiga, waxaa dhici karta inaadan waligaa mar dambe aadan awoodin inaad ka codsato sharci wadanka Mareykanka (US).

## Kolka ay tahay inaad la tashato qareen?

La tasho qareen sharciyadda laanta socdaalka yaqaan **ka hor** inta aadan codsan magangelyo haddii:



- Aadan hubin midka uu yahay sharciga aad cuskanayso si aad u dalbato magangelyo.
- **AADAN** ku jirin jidka ka saaridda wadanka ama dacwooyin ka socda laanta socdaalka.
- Ay ka soo wareegtay 1 sanno ilaa kolkii aad soo gashay wadanka Mareykanka (US).
- Aad ka qaadatay dhalasho ama aad ka tahay muwaadin in ka badan hal wadan.
- Lagu xiray, lagugu soo eedeeyey ama lagugu helay wax dambi ah intii aad ku noolayd Maryekanka (US).
- Aad mar ka mid noqotay jabhad ama urur falaago ah, ama wax koox ah oo hubaysan oo wadan ka jirtay.

## Xaggee ayaan ka heli karaa qareen i caawiya?

Ka baar qareeno lacag la'aan ah iyo rugo dhanka sharciga dadka ka caawiya barta LawHelpMN.org. Qareenadda lacag la'aanta ah cid walba ayaa aad u rabta. Ma lagu siinayo hubaal ah inaad helayso qareen bilaash ah sababta oo ah waad codsatay uun. Siddoo kale waxa aad la hadli kartaa qareen aad jeebkaaga ka qabsanayso haddii aad awoodid inaad bixiso $200 oo la kulmida koowaad ah. Qaar ka mid ah qareenada dadku qabsadaa waxa ay sameeyaan kulano la talin ah oo lacag la'aan ah.

# Sidda lagu Codsado Magangelyadda

## Goorma ayaan codsadaa magangelyo?

**Waa khasab inaad ku dalbatid magangelyo 1 sanno gudahii markii ugu dambaysay ee aad soo gashay Mareykanka (US).** Tani waxa ay ka bilaabmi kartaa maalintii aad ku soo gashay Mareykanka (US) fiise (visa) ama maalintii aad ka soo gudbay xuduudka. Ma **AHA** maalinta lagaa soo daayey xabsiga ama maalinta fiisahaagu (visa) uu dhacay.

Waxaa jira waxyaabo laga reebo kuwaa. La tasho qareen sharciga laanta socdaalka (immigration) yaqaan haddii ay ka soo wareegtay muddo ka badan hal sanno ilaa intii aad timid Mareykanka (US).



**Tusaale: Oscar waxa uu rabaa inuu dalbado magangelyo.**
Waxa uu ka soo gudbay xuduudka bishii Luulyo 12, 2024. Waa khasab inuu boostadda ku diro codsigiisa magangelyadda si kolkaa loo **helo** bisha Luulyo 11, 2025. Oscar waxa u u baahan yahay inuu boostadda ku diro codsigiisa labo asbuuc ka hor bisha Luulyo 11 si uga soo baxo waqtiga kama dambaysta ah ee shuruuda xareysiga codsiga ah.

## Siddee ayaan ku dalban karaa Magangelyo?

Nidaamku isku si uma wada aha cid walba. Barta LawHelpMN.org waxaa ku jira warqado xog aruursan ah oo kala duwan oo kugu hagi talaabooyinka dalbashadda magangelyadda. Waxa ay ku xiran tahay meesha ay tahay inaad ka xareyso codsigaaga.

Haddii aad qof qaan-gaar ah tahay, nidaamka aad isticmaalaysaa waxa uu ku xiran yahay inaad ku jirto "Jidka Saaridda" iyo in kale.

- Haddii aad tahay **qof weyn oo jaa ku jira jidka saaridda/Dacwooyin ka socda Laanta Socdaalka:** Waxa aad u baahan tahay inaad cuskato waxa la yiraa "habka is-daafaca" si aad uga codsato magangelyo maxkamad laanta socdaalka ah. Mari (scan) kooda QR (QR code) si aad u aragto warqadayadda xogta aruursan ah ee ku saabsan habka is-daafaca (defensive process). Waxa aad ka dalban magangelyo maxkamad **laanta socdaalka ah.**

- Haddii aad tahay **qof weyn** oo **AAN ku jirin jidka saaridda/dacwooyin ka socda Laanta Socdaalka:** Waa khasab inaad cuskato waxa la yiraa "habka suuban" si aad uga dalbato magangelyo Hay'adda Muwaadinka iyo Adeegyadda ee Laanta Socdaalka (USCIS) ee Mareykanka (US). Mari (scan) kooda QR (QR code) si aad u aragto warqadayadda xogta aruursan ah ee ku saabsan Habka suuban (affirmative process). Ka dalbo magangelyo hay'adda **USCIS**.

- Haddii **aad ka yar tahay da'da 18-sanno** jirka aadna ku nooshahay Mareykanka (US) **waalid ama cid kaa mas'uul ah la'aan:** Waa khasab inaad cuskato waxa la yiraa 'habka suuban" si aad uga codsato magangelyo hay'adda USCIS. Habkani waa uu ka duwan yahay kuwa haddii aad dalbanayso magangelyo adigoo qof weyn ah. Mari (scan) kooda QR (QR code) si aad u aragto warqadayadda xogta aruursan ah ee ku saabsan habka suuban ee ilmaha aan qaangaarka ahayn ee aan la wehelin (affirmative process for unaccompanied minors). Waxa aad ka codsan magangelyadda ha'yadda **USCIS**.

## Siddee ayaan ku ogaan in aan ku jiro “Jidka Saaridda”

Sidda ugu weyn ee lagu ogaado in aad ku jirto Jidka Saariddu” waa haddii laanta socdaalku (immigration) ay kuu soo dirto adiga Ogaysiis u Imaansho ah ama NTA.

Ogaysiiska u Imaanshaha ahi waa qoraal aad ka hesho Waaxda Amaanka Qaranka (Department of Homeland Security). Macnaheeduna waa dowladdu waxa ay isku dayeysaa inay ku masaafuriso waana **khasab inaad tagto maxkamadda**. Ogaysiiska u Imaanshahu waxa uu yiraa sababta ay dowladdu isu leedahay waa in lagu masaafuriyo. Waa inuu siddoo kalena yiraa **taariikhda** iyo **goobta ay dacwadaadda koowaad** ka dhacayso. Barta LawHelpMN waxaa ku jira xog aruursan oo ka hadasha waxa la sameeyo haddii aad hesho Ogaysiiska u Imaanshaha ah. Waxay kaloo haysaa tusmo Ogaysiiska Imaanshaha ah. Mari (Scan) koodka QR (QR code) ama gal mareegta: Waxa la sameeyo haddii aad hesho ogaysiiska uga Yeerida Maxkamadda Laanta socdaalka (immigration)

Haddii aad heshay waxa ay la yiraa NTA, waxa aad ku jirtaa Jidka Saaridda aan ka **AHAYN**:

- In NTA aan WALIGEED marna laga xareyn Maxkamad Laanta Socdaalku ay leedahay.
  AMA
- Kiiskaaga laanta socdaalka la baa’biyey.

Haddii aad ku jirto **Jidka Saaridda,** waxa aad u baahan tahay inaad cuskato waxa la yiraa **habka is- daafaca** si aad uga dalbato magangelyo maxkamad laanta socdaalka ah. Mari (scan) kooda QR (QR code) si aad u aragto warqadayadda xogta aruursan ah ee ku saabsan habka is-daafaca (defensive process). Waxa aad ka dalban magangelyo maxkamad **laanta socdaalku ah.** Ka dalbo magangelyo **maxkamad laanta socdaalka ah.**

Haddii **AADAN** ku jirin jidka **Saaridda** waxa aad u baahan tahay inaad cuskato waxa la yiraa **“habka suuban”** si aad uga dalbato magangelyo Hay’adda Muwaadinka iyo Adeegyadda Laanta Socdaalka (USCIS) ee Mareykanka (US). Mari (scan) koodka QR (QR code) si aad u aragto warqadayadda xogta aruursan ah ee ku saabsan habka suuban (affirmative process). Ka dalbo magangelyo hay’adda **USCIS**.

## Sidda ayaan u baari karaa in Ogaysiis u Imaansho ah laga Xareeyey Maxkamad Laanta Socdaalku leedahay?

Waxaa laga yaabaa in laguu soo diray Ogaysiiska Imaanshaha oo aadanba ogayn. Marmarka qaarkood Ogaysiiska Imaanshaha waxaa loo diraa ciwaankaagii hore. **KA HOR** inta aadan dalban magangelyo, hubi si aad u eegto inaad leedahay wax dacwo-qaadid ah oo aad ku leedahay maxkamad laanta socdaalku leedahay.

**Telefan By Phone.** Wac khadka Xafiiska Sare ee Dib u Eegida Dacwooyinka ee Laanta Socdaalka (EOIR) ee **1-800-898-7180**. Geli lambarkaaga- A (A-Number) ama "Lambarka Diiwaangelinta Ajnabiga (Alien Registration Number)." (Gal barta us-immigration.com si aad u ogaato lambarkaaga-A.) Isticmaal taxaalka waxyaabaha la kala dooran karo ah si aad u eegto taariikhda iyo waqtiga dacwo-qaadidaadda. Khadku waxa uu leeyahay labada af ee Ingiriiska iyo Isbaanishka. Riix 2 si aad u hesho caawin afka Isbaanishka ah.

**Khadka (Online).** Gal barta acis.eoir.justice.gov. Geli lambarkaaga-A. Fiiri "Akhbaarta Xigta ee Dacwo Qaadidda" "(Next Hearing Information)" iyo Akhbaarta la soo Xiriirida ee Maxkamadda "(Court Contact Information.)"

**Haddii aad leedahay balan dacwo-qaadid oo uu kuu qabsan kolkaa Ogaysiiskaaga u Imaanshaha ah waa la xareeyey.** Waa inaad raacdo habka is-daafaca aadna ka xareysato magangelyo maxkamad laanta socdaalku ay leedahay.

**Haddii ay tiraa "wax kiis ah lama helin,"** kolkaa MA aad lehid wax Ogaysiis Imaansho ah iminka. Waa inaad raacdo waxa la yiraa habka suuban aadna ka xareysato hay'adda USCIS.

## Maxaa dhaca haddii aan codsigayga u diro meel khalad ah?

Durbadiiba waa la diidi. Waa in lagu soo celiyo ciwaankaaga boostadda. Waxa aad u baahan tahay inaad dib-uga-xareyso codsigaaga meesha saxda ah.

## Dadka kale ee qoyskaygu iyana ma inay dalbadaanbaa magangelyo?

Haddii laguu ansaxiyo magangelyo, xilahaaga, iyo wixii ilmo ah ee aad dhashay ee aan wali guursan ee ka yar da'da 21 sanno jirka iyana waxaa siddoo kale loo ansaxin magangelyo haddii ay wali ku nool yihiin Mareykanka (US). Kolka aad dalbato magangelyo waa khasab inaad ku darto iyaga codsigaaga haddii aad rabto in ay iyana helaan sharci magangelyo. **Waa inay siddoo kale ay iyana xareystaan codsiyo magangelyo oo ay iyagu leeyihiin oo u gaar u ah.**



# Sidda loo Codsado Ogolaasho Shaqo

## Ma shaqeyn karaa inta aan sugayso go'aan ku saabsan codsigayga Magangelyadda?

Waxa aad uga baahan tahay ogolaansho dowladda Mareykanka (US) si aad si sharci ah uga shaqeyso wadanka Mareykanka (US). Waa khasab inaad dalbato warqad shaqo. Ma aad shaqeyn kartid inta aad ka helayso ansaxintan.

## Ma dalban karaa warqad shaqo markiiba?

May.



- Waa khasab inaad sugto **150 cisho** ka dib kolka aad xareysato codsi magangelyo ka hor inta aadan **dalban** warqad shaqo.
- Waxa ay qaadataa 30 cisho in lagu dhameeyo codsiga warqadda shaqadda.Taa macnaheedu waa waxa ay qaadataa 180 cisho laga bilaabo marka aad xareyso codsiga magangelyadda in dowladdu ay ku ansaxiso codsigaaga warqadda shaqada. Mudaddan sugida ah ee 180-cisho ah waxaa loogu yeeraa "**waqtigaaga.**" Haddii laguu ansaxiyo warqadda shaqadda waxa aad heli kaar xaqiijinaya inaad ka shaqeyn karto Mareykanka (US).



**Tusaale: Sonia waxa ay rabtaa inay dalbato warqad shaqo.**

Sonia kuma jirto jidka saaridda/dacwo laanta socdaalka ka socota. Waxa ay ka dalbatay magangelyo iyadoo cuskanayso waxa la yiraa habka suuban hay'adda USCIS.

- Juun 8, 2024: Sonia waxa ay **boostadda ugu dirtay codsigeeda hay'adda** USCIS.
- Agoosto 1, 2024: Hay'adda USCIS waxa ay heshay **codsigii magangelyadda ee Sonia** waxa ayna u soo dirtay iyadda rasiid.
- Deseembar 29, 2024 (150 cisho ayaa la dhaafay): Sonia waxa ay **xaq u yeelatay inay dalbato** warqad shaqo. Waxa ay u dirtay codsigeeda warqadda shaqada hay'adda USCIS.
- Janaayo 28, 2025 (180 cisho ayaa la dhaafay): Hay'adda USCIS waxa ay ansaxisay codsigii warqadeedda shaqadda. Waxa ay ugu soo direen kaarka warqadeedda shaqada ah boostadda. **Sonia hadda waxa ay xaq u leedahay inay shaqo bilowdo.**



**Digniin!**

**Marmarka qaarkood waqtigaagu waa uu istaagaa** waana inaad sugtaa waqtiga intaa ka dheer ka hor inta aadan xaq u yeelan inaad shaqayso.

## Maxaa ka dhiga in "waqtigaygu" istaago?

Hay'adda USCIS ma ay ansixin karto codsigaagga warqadda shaqadda ilaa iyo inta 180 cisho ay ka gudbayso waqtigaaga. Waqtigu waxa uu bilowdaa maalinta ay hay'addu hesho codsigaaga magangelyadda. Si waqtigu uu u socdo, waa khasab inaad iska ilaaliso sameynta wax waqtiga joojin kara. Waqtigu waxa uu istaagtaa marka **adigu** aad ku keento dib u dhac codsigaaga magangelyadda.

- **Habka magangelyadda suuban ee hay'adda USCIS.** Waqtigaagu waxa uu istaagaa haddii aad gafto balan faro-qaadid ah oo laguu qabtay ama waraysi hay'adda USCIS ah. Siddoo kale waxa uu istaagaa haddii aad codsato in balan ama wareysi dib laguugu dhigo. Waxa uu **bilowdaa mar labaad** markaa aad tagto balantaadda cusub. Waxaa jira liis ah dhamaan sababaha waqtigaagu uu uga istaagi karo shabakadda (website) hay'adda USCIS.

- **Habka is-daafaca ee magangelyadda ee maxkamada laanta socdaalka.** Waqtigaagu waa uu istaagaa haddii aad lahayd dacwo-qaadid maxkamadeed aadna codsato in lagu siiyo waqti aad ku raadsato qareen. Taa waxaa la yiraa "dib u dhigid." Waqtigaagu siddoo kale waa uu istaagaa haddii aad gafto balan faro iyo sawir qaadid (biometrics) ah. Waxaa laga yaabaa inaad awoodo inaad **dib u bilowdo waqtigaaga mar labaad** marka xigta ee balan maxkamadeed aad leedahay. Waxaa jira liis ah dhamaan sababaha waqtigaagu uu uga istaagi karo oo ku jira shabakadda (website) Wasaaradda Cadaaladda ee Mareykanka (US). La xiriir maxkamadda haddii aad is-leedahay in waqtigaaga si khalad ah loo joojiyey.



### Tusaale: Lorena waxa ay rabtaa inay dalbato warqad shaqo.

Lorena waxa ay ku jirtay jidka saaridda/dacwadda ka socota laanta socdaalka. Waxa ay ka dalbatay magangelyo iyadoo cuskanaysa habka is-daafaca ee maxkamadda laanta socdaalka ah.

- Luulyo 1, 2024: Maxkamadda laanta socdaalku **waxa ay heshay Lorena codsigeeda magangelyo.**
- Agoosto 15, 2024: Lorena waxa ay codsatay in dib loo dhigo dacwo-qaadidda maxkamadda laanta socdaalka, si kolkaa ay **u hesho waqti ay qareen ku hesho.**

Xaakimkuna waa uu ku raacay. Waqtigeedii kolkaa waa uu istaagay. Waxa ay jaa haysatay 44 cisho oo waqtigeedii ah kolkii uu istaagay waqtigu.

- Sebteembar 30, 2024: Lorena waxa ay heshay **qareen waxa ayna tagtay maxkamadeeddii xigtay** ee dacwo-qaadidda ee laanta socdaalka ee Minnesota. Waqtigeedii mar kale ayuu dib u bilaabmay.
- Janaayo 14, 2025: Lorena **waxa ay xaq u leedahay inay dalbato** warqad shaqo. Waxa ay u dirtay codsigeedda warqadda shaqada hay'adda USCIS.
- Febraayo 13, 2025: Hay'dda USCIS waxa ay ansixisay codsiga kaarka warqadda shaqada. Waxa ay uga soo direen kaarka warqadda shaqadda boostadda. Lorena **hadda waxa ay xaq u leedahay inay bilowdo shaqo.**

## Kolka uu dhamaado xilligayga sugida, siddee ayaan ku dalbadaa warqada shaqadda?

Barta LawHelpMN waxa ay haysaa warqad xog aruursan ku jirto oo ka hadasha sidda loo dalbado warqadda shaqadda. Mari (scan) koodka QR (QR code) ama gal mareegta: *Sidda Lagu Helo Ogolaansho looga Shaqeyn karo Minnesota*.



**© 2027 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**